



WISCONSIN DEPARTMENT of HEALTH SERVICES

Habka Intarnetka ee Xaqiinjinta Booqashada (Electronic Visit Verification ama EVV) ee Adeegyada Dadka Haysta Kaarka Caafimaadka ee Wisconsin Medicaid Personal Care Services

Sharciga federaalka ayaa shuruud ka dhigaya gobollada oo dhan in ay EVV u adeegsadaan adeegyada daryeelka shakhsiga ah ee maalgelinta ka hela Medicaid.

EVV ma bilaaban bilowgii 2020 ka hor balse waa barnaamij loo fulin doono sannadkan hadba heer.

Shaqaaluhu waxay isticmaali karaan barnaamij ah app, taleefanka miiska xafiiska, ama shaashad uu ku jiro EVV. Waxay ku xiran tahay sida hawsha loo qabanayo, waxaana dhici karta inaysan dadka la daryeelayo ogaanin EVV.

The Department of Health

Services (Waaxda Adeegyada Caafimaadka ama DHS), waxay wada shaqeynayaan DXC Technology, iyo Sandata si ay ula jaanqaadaan sharciyada EVV iyagoo tababaraya shaqaalaha adeegsanaya. Waxaa ku xig doona wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan taariikhaha iyo qaabka tababarka.

Ballanqaadka Wisconsin

Wixii cusub waxaan dadka kula socodiineynaa goobaha barkulanka dadweynaha, guddiyo tala-bixin ah iyo siyaabo kale. Waxaan qiimeyneynaa talada aan kaa helno annagoo soo dhaweyn doonna fikrado iyo su'aalo wixii aad qabto.

Waxaan ka shaqeyn doonnaa:

- In la joogteeyo adeegyada la qabto, sida in bulshada la isku xiro.
- In dadka lagu taageero xulashada dhakhtarka.
- Inay dadku doortaan qofka kiiskooda uga shaqeynaya.
- In la hubiyo helidda daryeelka ay dadku u baahan yihiin.
- In la hubiyo loona dhowro dadka xogtooda iyo cabashada sida uu dhigayo Health Insurance Portability and Accountability (Sharciga Qarinta Macluumaadka Ceymiska iyo Caafimaadka Bukaanka) (HIPAA).

P-02462SO (07/2019)

Iyadoo loo eegayo sharciga Qeybtiisa 12006(a) ee 21st Century Cures Act, waxaa shuruud laga dhigay inay gobollada oo dhan ku dhaqmaan EVV oo ah barnaamij khuseeya habka daryeelka shakhsiga ah ee Medicaid marka loo baahdo booqashada adeegga guryaha.

EVV waxay isticmaaleysaa qalab wax lagu duubo sida:

- Shaqaalaha iyo nooca daryeelka
- Dadka daryeelka loo qabtay
- Goorta iyo meesha booqashadu ka bilaabatay kuna dhammaatay

EVV macnaheedu ma aha in wax laga beddelay daryeelka dadka loo hayo.

Faahfaahin

Haddii aad rabto inaad hesho faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan EVV iyo Wisconsin, waxaan kuu haynaa macluumaadka hoos ku qoran:

Su'aalaha Soo Noqnoqda (FAQs):

<https://www.dhs.wisconsin.gov/evv/faq.htm>

Wixii faallo ama su'aalo ah noogu soo dir:

dhsevv@dhs.wisconsin.gov

P-02462SO (07/2019)

Iyadoo loo eegayo sharciga Qeybtiisa 12006(a) ee 21st Century Cures Act, waxaa shuruud laga dhigay inay gobollada oo dhan ku dhaqmaan EVV oo ah barnaamij khuseeya habka daryeelka shakhsiga ah ee Medicaid marka loo baahdo booqashada adeegga guryaha.